

Amniga gaadhiga – caruurta iyo waayeelka




Statens vegvesen



TRYGG TRAFIKK



Ilmaha ka gaaban 135 cm waa in lagu fadhiisiyo kursi caruureed



§ Waa waajib in ay dadka waaweyni xidhaan suunka gaadhiga, iyo in la sugo amniga dhamaan caruurta gaadhiga saaran.

Caruurta ka gaaban 135 cm waa in lagu xidho kursiga caruurta kaas oo ku haboon ilmahaas miisaankiisa. Darawalka ayaa masuul ka ah ilmaha ka yar 15 sano in uu si sharciyeesan u fadhiyo, darawalkaana la ganaaxayaa haddii kantarool loo istaajo.

Qofkii suunku aanu u xidhnayn ama si khaldan u fadhiya si aad ah ayuu u dhaawacmi karaa xataa haddii xawaarahu gaadhigu uu yar yahayba. Markaa marwalba waa muhiim in caruurtana kursigooda lagu fadhiisiyo, dadka waaweyna ay suunka xidhaan, xataa safarada aadka u gaagaaban sida xanaanada caruurta ama dugsiga.

Kursiga caruurta:

Kuraasta caruurta waxa loo eega miisaanka ilmaha. Aad ayey muhiim u tahay in si deggan loo raaco buuga isticmaalka, si aad si fiican igu rakibtid gaadhiga. Waad weydiisan kartaa dukaanka aad ka iibsatay in uu kaa caawiyo rakibida.

Kuraasta caruurta ee duuga ah

Haddii aad iibsatid kursi duug ah yaanu ka weynaan 5 sano. Waa in aad ogaatid in aanu kursigani shil gaadhi soo galin.



Sabiyo

0 – 13 kg (0 ilaa iyo qiyaas ahaan 12 bilood)

Gadaal u jeedi (dhabarka u jeedi dhanka gaadhigu u socdo) markaas ayuu kursiga ilmuhu ugu amni badan yahay, waxana lagugula talinayaa in aad ku bilawdidba marka uu ilmuhu dhasho.



Caruurta yaryar

9 – 18 kg (qiyaas ahaan 1 ilaa 4 sano)

Caruurta yaryar waxa lagu fadhiisinayaa kursi caruureed. Kursiga oo gadaal loo jeediyo ayaa ugu amni badan, laakiin waa la ogol yahay in hore loo jeediya marka miisaanka ilmuhu intan yahay.

Waxaan idinku wacyi gelinaynaa in aad kursiga ilmaha gadaal u jeedisaan ugu yaraan inta uu ilmuhu ka yar yahay 4 sano. Ilmaha madaxiisa ayaa aad u weyn oo culus marka loo eego jidhka ilmaha markaa in gadaal loo jeediyo waxa ay dhimaysaa khatarta in uu qoorta ka dhaawacmo.

Suumamka kursiga ha lagu gijjiyo ilmaha.



Caruurta waaweyn

15 – 36 kg (qiyaas 4 – 11 sano)

Caruurta waaweyn waa in lagu fadhiisiyo kursiga caruurta oo leh dhabar iyo sal hoose oo lagu fadhiisto. Kursi caruureedka leh dhabarka waxa uu uga difaac wacan yahay ilmaha jidhkiisa iyo madaxiisa marka la dhinac dhigo ka aan lahayn dhabarka gaar ahaan marka gaadhiga dhinac laga duqeeyo. Labada noocba ha lagu xidho suunka gaadhiga. Kursiga caruurta ee ah salka hoose uun ama ka wata dhabarka midkoodna looma isticmaali karo in lagu xidho kursiga gaadhiga ee leh suunka sinaha oo kaliya. Ilmaha marna ha ka marin suunka gaadhiga gacmahooda hoostood, taasi waxa ay sababi kartaa dhaawacyo khatar ah.



Dadka waaweyn iyo gaadhi

Suunka gaadhigu waxa uu badbaadiyaa nafo

Waa waajib in markasta suunka gaadhiga la xidho, xataa haddii aad fahdidid kursiga danbe. Rakaabka ka weyn 15 sano iyaga ayaa la ganaaxayaa haddii aanay xidhnayn suunka gaadhiga.

Mar walba xidho suunka – xataa safarada gaagaaban


Suun li'i khatartu aad ayey u weyn tahay in aad, aad ugu dhaawacantid shil gaadhi, xataa haddii uu gaadhiga xawaarihiisu hooseeyay. Haddii shil dhaco iyadoo gaadhigu uu ku socdo wax ka yar 50 kilomitir sacaddiiba waxa dhacaya in aad ka soo godid shookaanta, muraayada hore ama qeybo kale oo ka tirsan gaadhiga. Natijadu waxa ay noqonaysaa dhaawac halis ah ama naf bax.

Gabadh uur leh?

Dumarka uurka leh waa in ay suunka gaadhiga xidhaan sida dadka kale oo dhan, taas ayaa ugu amni badan haweenayda iyo ilmaha caloosha ku jiraba. Suunka gaadhiga qeybtiisa hoose hoos ha ka mariso caloosha intaanay suunka gijjin.



Airbag



Dadka waaweyn airbag-shu waxa ay u tahay difaac, si ay airbag-shu si fiican ay u shaqeeso waa in mar walba la xidhnaado suunka gaadhiga.

Ilmaha ku fadhiya kursiga caruurta airbag in la hor fadhiisiyo waa khatar. Airbag-sha waxa loogu talo galay dadka waaweyn oo waxa ay ku soo baxaysaa xawaare daran, taasina waxa aad ay u dhaawaci kartaa ilmaha. Markaa caruurta ka gaaban 140 cm yaan la fadhiisin kursiga ku xiga darawalka, haddii uu airbag leeyahay.

Gaadiyada cusub qaarkood waad ka furi kartaa airbag-ga haddii aad ilme ku fadhiisinaysid kursigaas. Gaadiyada kale waa in aad geerash geysid gaadhiga. Airbag-yada yaryar ee dhinacyada iyo saqafka ka soo baxaya khatar uma aha caruurta sida saxda loo fadhiisiyay.

Gaadhi buuxa?

Dhamaan dadka gaadhiga saaran waa in qof walba uu haysto kursi iyo suun u gaar ah. Ma banaana in gaadhiga ay saarnaadaan dad ka badan inta uu ku duwaangashan yahay. In ilme dhabta lagu qabto waa manuuc, waana khatar. Sidoo kale sharci ma aha in dhawr ilmood ama qof weyn iyo hal cunug ay wadaagaan hal suun.

Warbixino dheeraad ah waxa aad ka helaysaa internet-ka

www.vegvesen.no

website-yada waaxda gaadiidka (Statens Vegvesen) waxa aad ka helaysaa warbixino ku saabsan gaadhi wadid baarashada, badalaada liisanada gaadiidka ee wadamada kale, diwaan gelinta gaadiidka iyo wixii la mida.

www.tryggtrafikk.no

website-yada Trygg Trafikk waxaad ka helaysaa warbixino ku saabsan sida ugu sugan ee ilmaha loogu fadhiisiyo gaadhiga, xidhida suunka gaadhiga, caruurta iyo baaskeel wadida, wadada dugsiga, IWM.





Buugan yarahan dabacaadiisa waxa kaalmeeyay shirkadaha igshooranka ee Norway.
Oversatt ved Tolketjenesten i Oslo, februar 2010